# Wargelin Bulsheed

Farriintan waxaa la soo gelin doonaa onlaynka iyadoo ku qoran af اللغة العربية, English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文 iyo Tiếng Việt.

**Taariikhda:** 28-ka Janaayo, 2026

**Ku socoto**: Xubnaha bulshada I/DD iyo shaqaalaha ODDS

**Ka socoto:** Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (ODDS)

**Mawduuca:** **Muddada faallada dadweynuhu furan tahay ee wargelinada ka-dhaafitaanada Medicaid**

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (ODDS, Office of Developmental Disabilities Services) ayaa cusbooneysiinaya ka-dhaafitaanadiisa 1915(c) Medicaid. Waxaan kaa codsanaynaa ra'yiga aad ka qabto isbeddellada aan soo jeedinay. Isbeddellada qaarkood ayaa adeegyada ka dhigi doona kuwo si fudud loo heli karo. Isbeddellada kale waa kuwo yaryar mana saamayn doonaan adeegyadaada.

Ka-dhaafitaanada isbeddelku ku yimid waxaa ka mid ah:

- Ka-dhaafitaanka Adeegyada Hoyga Dadka Waaweyn iyo Adeegyada Bulsheed
- Ka-dhaafitaanka Hoyga Carruurta iyo Adeegyada Bulsheed
- Ka-dhaafitaanka Baahiyaha Qayrucaadiga ah ee Carruurta
- Ka-dhaafitaanka Habdhaqanka
- Ka-dhaafitaanka Dadka Caafimaad ahaan Nugul

- Ka-dhaafitaanka Dadka Ku Lugta leh Caafimaadka

Hoos waxaa ku qoran macluumaad kooban oo khuseeya isbeddellada. Fadlan akhri. Haddii aad u baahan tahay turjumaad, gujo-raacyo ayaan soo raacinay qaybta sare ee fariintan. Ka-dhaafitaanada buuxa ee isbeddellada la soo jeediyay waxay ku jiraan mareegta ODDS iyagoo ku qoran af Ingiriisi.. Uma baahnid inaad akhrido ka-dhaafitaanada oo dhan si aad jawaab-celin u bixiso. Akhrinta macluumaadka kooban ayaa kugu filan.

## Macluumaadka kooban ee isbeddelada la soo jeediyay

- **U-qalmitaanka la balaadhiyay ee adeegyada Medicaid:** Isbeddelkani wuxuu saameeyaa dhammaan lixda ka-dhaafitaan. Isbeddelku wuxuu u sahli doonaa carruurta ka soo jeeda qoysaska dakhligoodu hooseeyo inay helaan adeegyada ka-dhaafitaanka. Sababtee ayuu isbaddalkani u dhacayaa? Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA, Oregon Health Authority) ayaa isbeddelkan ku samaynaya qorshaha Oregon Medicaid State Plan. ODDS ayaa isbeddelkani samaynaya si ay ula jaanqaadaan OHA.
- **Foomam yar oo saxiix u baahan:** Shuruuddii saxiixa ayaan ka saarnay foomka Xorriyadda Dooqa iyo foomka Ogeysiiska Xuquuqaha. Tani waxay sahlaysaa in la helo adeegyada. Dadku kuma khasbana inay saxiixaan foomam badan. Isuduwayaasha adeegyada iyo wakiillada gaarka ah ayaa foomamka weli u dul mari doona shakhsiyaadka waxayna arrintani ku muujin doonaan qoraalladooda horusocodka.

- **Isbeddelada ku yimid ereyada iyo qaabka:** Kuwani dhammaantood waa isbeddello farsamo. Isbeddelladani midkoodna ma saamaynayo adeegyada shakhsigu helo.

Farriintani waxaa la soo geliyay bogga bulshada ee barnamaijyada naafanimada korriinka iyo bogga dilaaliinta adeegyada taageerada. Iyaga ayaad ka codsan kartaa nuqulo daabacan.

## Sida loo soo gudbiyo faallooyinka

1. Iimayl u dir odds.waivers@odhsoha.oregon.gov.
2. Ugu dir boostada faallooyin qoraal ah ODDS Medicaid waiver/State Plan analyst, 500 Summer Street NE E-09, Salem, OR 97301.

**Wakhtiga kamadambeysta ah waa 27-ka Febraayo, 2026.** Faallooyinka boostada lagu diro waa inaan helno ugu dambeyn taariikhdan.

Mahadsanid,

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Kobaca (ODDS)

---

Waxaad dukumintigaan ku heli kartaa si bilaash ah isagoo ku qoran luuqado kale, far waawayn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad ku dooneyso. Iimayl ku soo dir dd.directorsoffice@odhs.oregon.gov ama wac 503-945-5811. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka maqalku ku adag yahay.

**Khayraadka**

- Isku diiwaangeli wargelinada ODDS.
- Wax ka ogow dhacdooyinka ODDS.
- Isku diiwaangeli wargelinada Adeegyada Aadanaha ee Oregon.
- Akhri farriimo ka socdo ODDS.
- Naga soo raac Facebook @oregondhs.idd